## Haddii aad cabasho u qabtid qof kale

Haddii aad ka walaacsantahay in gabar aad taqaanid ay halis ugu jirto FGM/C, waxaan cabashadaada kaga hadli karnaa ballantaada. Waxaad dabadeed warbixin u diri karnaa Tusla, hay'ad magangalyada caruurta Ireland.

Waxaad dabadeed warbixin u diri karnaa Tusla, hay'ad magangalyada caruurta Ireland. Sidookale waa sharci darro in laga wado ama la isku dayo in gabar looga wado Ireland si FGM/C loogu sameeyo.

Haddii qof aad taqaanid halis degdeg ah ugu jiro FGM/C, fadlan kala xiriir leenka qarsoodida Xafiiska Adeegyada Magangalyada Qaranka Garda ee 1800 666 111.

## Adeegyada kale ee caafimaad ee magangalyo galmo

Ee IFPA, waxaan sidookale bixinaa adeegyada soo socda:

- Baaritaanka kansarka afka ilmo galeenka
- Baaritaanka naasaha
- Ka hortagga uurka
- Daryeelka ilma soo ridida
- Kaalmada uurka aan loo qasdin
- Baaritaanka infekshnada galmada lagu kala qaado, ay ku jirto HIV
- Baaritaanada caado istaaga

## Ballan sameysasho

Adeegyadeena waxey yaaliin Dublin. Si aad ballan u qabsatid, waxaad:

Wici kartaa 01 872 7088

Iimayl u diri kartaa reception@ifpa.ie

Shaqaalaheena waxey ku hadlaan English, laakiin waxaan bixin karnaa turjume oo ku hadla luuqadaada. Tani waa lacag la'aan. Fadlan noo sheeg haddii aad u baahantahay turjumaan.

*Iskaan garee koodhka QR ee hoose wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Adeegeena Daaweynta, lagu heli karo luuqado kala duwan.*

### Goobaha Adeegga Daaweynta FGM/C

**Xarunta IFPA ee Magaalada Dublin**
Wadada 5/7 Cathal Brugha
Dublin 1

**IFPA Tallaght**
Level 3, The Square Shopping Centre
Tallaght
Dublin 24

# Adeega Daweynta FGM/C

**Waxaan siinaa daryeel caafimaad oo durugsan dadka soo maray gudniinka ama jarida fircooniga ee dumarka (FGM/C)**



Rebeka Artim for My Body is My Own, UNFPA, 2021

# Waa maxey Gudniinka/ Jarida Fircooniga ee Dumarka (FGM/C)

Gudniinka/jarida fircooniga ee dumarka (FGM/C) waa dhaqan waxyeelo leh oo lagula kaco haween iyo gabdho ee bulshooyinka qaar ee dunida dacladeeda. Waa jarida, dhaawacida ama xirida xubinta taranka ee dumarka iyadoo sabab caafimaad jirin.

FGM/C waxey ku leedahay magacyo kala duwan qeybo kala duwan ee dunida. Dhaqankaaga waxaa loo garan karaa: circumcision; excision; gudniniin; sunna; halalays; khitan; thara; ibi ugwu; khifad; tahoor; absum; megrez; bondo; kutairi; mekhnishab; fanadu di mindjer; kuyango ama niaka.

FGM/C ma lahan faa'iido caafimaad waxeyna ku xadgudubtaa xuquuqda haweenka iyo gabdhaha. Dhammaan haweenka iyo gabdhaha waxey xaq u leeyihiin caafimaad, amni iyo sharaf.

# FGM/C wuxuu sababi karaa arrimaha caafimaad ee soo socda

- Xanuun ama nafis la'aan ee goobta taranka
- Caado xanuun leh
- Infekshano goobta taranka
- Ku adkaansho kaadida ama infekshano kaadida ah
- Galmo xanuun leh ama inaad awoodin inaad galmooto
- Ku adkaansho uur qaadis
- Xauuno xiliga cunug dhalista (fool dheer, dhiig bax ballaaran)
- Inaad awoodin inaad ku raaxeysato galmo ama sariir
- Xusuuso, sas iyo hurdada oo kuugu adkaata
- Isku-buuq, walbahaar, walwal

**Haddii aad la kulmeyso mid kamid ah dhibaatooyinkan, Adeegeena Daaweynta ayaa ku caawin karta.**

# Ballantaada

Dhakhtar ama kalkaaliso dumar ah ayaa wax kaa weydiin doonta dhibaatooyinka aad la kulmeyso FGM/C awgeed.

Dhakhtarka ayaa kuu sheegi doona daawooyinka la heli karo.

Waxey ku weydin karaan iney baaraan goobtaada taranka. Haddii aadan diyaar u ahayn in lagu baaro ballantaada kowaad, taasi waa Caadi.

Ballan kale ayaan u qaban karna baaritaanka markaad dareentid nafis dheeri ah. Haddii qalliin wax ka caawin karo, dhakhtarkeena ayaa kuu lifaaqi doona dhakhtar haween ah ee joogta Isbitaalka Rotunda. Qalliinku wuxuu ahaan doonaa mid bilaash ah.

# Adeegeena daaweynta

**Haddii aad soo martay FGM/C, waxaan halkan u joognaa inaan ku caawino.**

Waxaan siinaa daryeel caafimaad iyo taageero talo dadka soo maray FGM/C. Waxaan siineyney daryeelkan haween iyo gabdho wax ka badan 10 sanno.

Adeegu waa **bilaash, badqab iyo qarsoodi.**

# La hadlida xirfadle la-taliye ah ayaa ku caawin karta

**Khibrada qofwalba ee FGM/C way duwantahay, dadkuna si kala duwan bey u wajahaan.**

**Ma jirto qaab sax ama qalad ah oo la dareemo kadib FGM/C.**

Waan ognahay way adkaan kartaa in laga hadlo FGM/C. Haween badan way ku adkaataa iney kala hadlaan la-taliye khibradooda.

La-taliyeyaasheena ayaa kaa caawin kara inaad maareysid dareemahaaga.

Waxaad caawin u heli kartaa si aad ula tacaashid khibradaada qaabka aad rabto.

Adeegu waa **bilaash, badqab iyo qarsoodi.**